

Services Included in Adult Long-Term Care Programs – Iris, Family Care, Partnership, iyo PACE

(Services Included in Adult Long-Term Care Programs – Iris, Family Care, Partnership, and PACE)



Wisconsin waxay leedahay barnaamijyada dadweynaha ee siiyaa adeegyo dadka waayeelka ah iyo dadka weyn ee naafada ah. Barnaamijyadaan waxaa ka mid ah:

- IRIS (Include, Respect, I Self-Direct) (Kudar, Ixtiraam, Aniga Is Hago).
- Family Care.
- Partnership.
- PACE (Program of All-Inclusive Care for the Elderly) (Barnaamijka Daryeelka Dhammaan Loo dhanyahay ee Waayeelka).
- Medicaid.
- Adeegyada kaarka Medicaid ForwardHealth.

Buug-yaraahaan wuxuu muujinayaad adeegyada qeybta ka ah xirmada faa'idada barnaamij walba. Ma ahan in adeegyadoo dhan ay qoranyihiin. Adeegyada aad heshay waxay ku saleysanyihiin baahiyahaaga iyo sharuudaha kale ee barnaamijka.

Erayada la ogaado

Ka hor intaadan fiirin jadwalka adeegyada, iska hubi inaad garaneysid waxa erayo walba loola jeedo.

Haa

Barnaamijka waxaa ku jiro oo uu bixiyaa adeega. Adeega ayaa u baahan karo in la ansixyo marka hore.

Xadidan

Barnaamijka waxaa ku jiro adeega laakin leh xadidaadaha qaar.

Kaarka ForwardHealth

Waa inaad isticmaashaa kaarkaaga Medicaid ForwardHealth si aad ugu bixisid adeega.

Medicare

Waa inaad isticmaashaa qorshahaaga Medicare si aad u bixisid adeega.

(Ku sii soco bogga 2)



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

Adeegyada daryeelka muddada dheer

Waxaad u baahan kartaa hal ama ka badan oo adeegyada xiggo ee daryeelka muddada dheer:

Adeegyada daryeelka muddada dheer	Adeegyada kaarka ForwardHealth (ma ahan qeyb barnaamijka ah)	IRIS ¹	Family Care ²	Partnership ²	PACE ²
Xiriirinta daryeelka Maareeyaha dacwada iyo kaaliso ayaa raadraaco caafimaadkaaga, badqabka, iyo adeegyada	Maya	Caawin ka imaaneyso fiscal employer agent (wakiilka badrooniga maaliyada) iyo IRIS consultant (la taliyaha IRIS)	Haa: kaalisada iyo maareeyaha daryeelka	Haa: dhaqtarka, kaalisada dhaqtarka, kaaliso, iyo shaqaalaha bulshada	Haa: dhaqtarka, kaalisada iyo maareeyaha daryeelka, xiriiriyaha xarunta PACE, daaweeeyaha, taqasuska cuntada, iyo wax badan
Daryeelka maalinta qofka weyn ama daryeelka nasinta Adeegyada loogu tallogalay dadka weyn ee u baahan taageerada iyo kormeerka bulshada ama caafimaadka	Maya	Haa	Haa	Haa	Haa
Xafaayadaha dadka weyn, gacmo gashiga, iyo saadadka kale Qalabka caafimaadka, sheeyada, aaladaha, iyo saadadka	Haa	Kaarka ForwardHealth	Haa	Haa	Haa
Daaweynta alkulada iyo deroogada Daaweynta cudurada isticmaalka maandooriyaha	Haa	Kaarka ForwardHealth	Haa	Haa	Haa

(Ku sii soco bogga 3)



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

Adeegyada daryeelka muddada dheer	Adeegyada kaarka ForwardHealth (ma ahan qeyb barnaamijka ah)	IRIS ¹	Family Care ²	Partnership ²	PACE ²
Noolaanshaha la caawiyay iyo adeegyada daryeelka deegaanka Goobta noolaanshaha sida guriga oo ay ku jiraan daryeelka, daaweynta, iyo kormeerka	Maya	Xadidan ³	Xadidan	Xadidan	Xadidan
Gargaarada isgaarsiinta, turjubaanka, iyo fasiraha Shey, aalad, ama nidaamka kugu caawiyaa xiriirka	Maya	Haa	Haa	Haa	Haa
La talinta iyo daaweynta Adeega xirfadaha iyo daaweynta	Haa	Haa	Haa	Haa	Haa
Tababaridda hawlaha nolol-maalmeedka Xirfadaha wax barida ee kaa caawiyo qabashada howlo maalmeedka	Maya	Haa	Haa	Haa	Haa
Caafimaadka guriga iyo daryeelka shaqsiga Adeegyada kaa caawiyo howlo maalmeedka, sida daawo qaadashada ama meyrashada	Haa	Kaarka ForwardHealth ama daryeelka shaqsiga hago ⁴	Haa	Haa	Haa
Aqbaaraha guriga Fiirinta guriga hadda iyo sameynta hormarada ku saleysan baahida	Maya	Haa	Haa	Haa	Haa
Guryaha sakaraadka Daryeelka dadka qabo jirada dhimashada	Haa	Kaarka Medicare ama ForwardHealth	Haa, kaarka Medicare, ama ForwardHealth	Haa, ama kaarka Medicare	Haa, ama kaarka Medicare

(Ku sii soco bogga 4)



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

Adeegyada daryeelka muddada dheer	Adeegyada kaarka ForwardHealth (ma ahan qeyb barnaamijka ah)	IRIS ¹	Family Care ²	Partnership ²	PACE ²
Adeegyada shaqo Taageerada lagu helo shaqo laguna haysto	Maya	Haa	Haa	Haa	Haa
Cuntooyinka la keeno guriga Cuntooyinka diyaarsan, caafimaadan ee sida tooska ah loogu diro gurigaaga	Maya	Haa	Haa	Haa	Haa
Gaadiidka caafimaadka Gaadiidka lagu tago xaaladaha aan degdega aheyn, adeegyada caafimaadka Medicaid	Haa	Kaarka ForwardHealth	Haa	Haa	Haa
Caafimaadka damiirka, maalinta daaweynta caafimaadka damiirka, iyo barnaamijyada taageerada bulshada Daryeelka xirfadlaha la xiriiryay iyo daaweynta bulshada	Haa	Kaarka ForwardHealth	Haa	Haa	Haa
Gaadiidka aan caafimaadka aheyn Adeegyada gaadiidka ama sheeyada ku siiyo helitaanka adeegyada iyo dhacdooyinka bulshada	Maya	Haa	Haa	Haa	Haa
Guriga xanaanada Kaalisada xirfadeysan ama adeegyada soo kabsiga	Haa	Maya	Haa	Haa	Haa

(Ku sii soco bogga 5)

Adeegyada daryeelka muddada dheer	Adeegyada kaarka ForwardHealth (ma ahan qeyb barnaamijka ah)	IRIS ¹	Family Care ²	Partnership ²	PACE ²
Daaweynta jireed, shaqada, iyo luuqada hadalka Taageerada ka caawiso xirfadaha dhaqaaqa, nolol maalmeedka, iyo isgaarsiinta	Maya	Kaarka ForwardHealth	Haa	Haa	Haa
Alaabaha iyo adeegyada shaqsiga hago Adeega, taageerada, ama sheyga ka caawiyo baahida taageerada muddada dheer	Maya	Haa	Xadidan	Xadidan	Xadidan
Taageerid daryeel guriga ah Ka caawinta howlo maalmeedka, sida cunista, labisashada, iyo guri nadiifinta	Maya	Haa	Haa	Haa	Haa
Gaariga naafada iyo qalabka kale Xakameynada, qalabka, ama aaladaha	Haa	Kaarka ForwardHealth	Haa	Haa	Haa

Caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka

Caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka waxay ka yimaadaan dhaqtar, kaaliso, ama bixiyaha kale caafimaadka u qalma.

Adeegyadaan waxaa ku jiro:

- Ka hortaga cudurka
- Dayactirka caafimaadka
- Waxbarashada bukaanka

(Ku sii soco bogga 6)

Caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka	Adeegyada Kaarka ForwardHealth (ma ahan qeyb barnaamijka ah)	IRIS¹	Family Care²	Partnership²	PACE²
Daryeelka ilkaha	Haa, laakin isticmaal Medicare marka hore	Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth	MCO (Managed Care Organization) (Ururka Daryeelka La maareeyay) ayaa xiriiriyo. Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth.	Haa, laakiin waa in la isticmaalaa bixiyaha shabakada.	Haa, laakiin waa in la isticmaalaa bixiyaha shabakada.
Adeegyada dhaqtarka	Haa	Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth	MCO ayaa xiriiriyo. Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth.	Haa, laakiin waa in la isticmaalaa dhaqtarka shabakada, marka laga reebo daryeelka gurmadka ama xaalada degdega.	Haa, laakiin waa in la isticmaalaa dhaqtarka shabakada, marka laga reebo daryeelka gurmadka ama xaalada degdega.
Daryeelka cagaha (lugaha)	Haa	Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth	MCO ayaa xiriiriyo. Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth.	Haa.	Haa
Isbitaalka	Haa	Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth	Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth	Haa, laakiin waa in la isticmaalaa isbitaalka shabakada, marka laga reebo daryeelka gurmadka ama xaaladaha degdega.	Haa, laakiin waa in la isticmaalaa isbitaalka shabakada, marka laga reebo daryeelka gurmadka ama xaaladaha degdega.
Daawooyinka qoraalka	Haa, laakiin waa in la isticmaalaa Medicare Qeybta D marka hore	Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth (isticmaal Medicare Qeybta D marka hore)	Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth (isticmaal Medicare Qeybta D marka hore)	Haa	Haa

(Ku sii soco bogga 7)



Caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka	Adeegyada Kaarka ForwardHealth (ma ahan qeyb barnaamijka ah)	IRIS¹	Family Care²	Partnership²	PACE²
Aragga (waxaa ka mid ah ookiyaalaha indhaha)	Haa	Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth	Haa Ku lacag bixi kaarka Medicare iyo ForwardHealth.	Haa	Haa

Qoraallada Akhristaha

- ¹ Iyo IRIS, waxaad isticmaashaa miisaaniyada lagu iibsado adeegyada, taageerooyinka, iyo alaabaha ku saleysan qorshahaaga la ansixiyay ee IRIS. Wuxaa howlgelin kartaa naftaada bixiyayaasha adeega ama aad la shaqeysid hay'ada.
- ² Markii aad iska diiwaangelisid Family Care, Partnership, ama PACE, waxaad ku biirtay managed care organization (ururka daryeelka la maareeyay). Waxay hubiyaan inaad heshid adeegyada daryeelka muddada. Wuxaa ka dooratay adeegyadaada iyo bixiyayaasha shabakada.
- ³ Iska diiwaangelin kartid ama maka sii diiwaangashnaan kartid IRIS haddii aad ku nooshahay guriga xanaanada ama xarunta deegaanka bulshada ku saleysan.
- ⁴ Haddii aad caawin uga baahto howlaha daryeelka shaqsiga, waad u qalmi kartaa daryeelka gaarka ah ee shaqsiga hago. Waa nooc ka gooni ah adeega uu barnaamijka bixiyo waxaa dheeraad ah adeegyada kale ee aad ku heshid dhinaca IRIS.

Xasuusiyayaasha waxtar leh

- Soo kabida hantida waxay quseysaa Family Care, Partnership, PACE, iyo IRIS. Waxay sidoo kale quseysaa daryeelka shaqsiga ee lagu lacag bixiyo adeegyada daryeelka Medicaid iyo guriga xanaanada ee ay lacag bixiyeen Medicaid.
- Miyaad codsaneysaa Partnership? Haddii aad u qalantid Medicare, waa inaad iska diiwaangeliisa Partnership managed care organization's D-SNP (Dual Eligible Special Needs Plans) (ururka daryeelka la maareeyay ee Qorshooyinka Baahiyaha Gaarka ah ee U qalmid Labada ah).
- Iyo PACE, ma lacag bixineysid caymis wadaaga ama laga jari karo daawada qoraalka.
- Adeegyada barnaamijka adiga ayuu kugu xiranyahay iyo barnaamijka aad dooratid.
- Iyo Family Care, Partnership, iyo PACE, dhammaan bixiyayaasha waa inay heshiis la galaan managed care organization (ururka daryeelka la maareeyay).
- Iyo IRIS, IRIS consultant agency (hay'ada la talinta IRIS) iyo fiscal employer agent (hay'ada badrooniga maaliyada) waa inay ansixiyaan bixiyayaashoo dhan.
- Haddii aad leedahay Medicare ama aad ku daboolantahay sida waafaqsan qorshaha caymiska caafimaadka gaarka ah, qorshooyinkaas waxaa la soo dirayaan ka hor Medicaid sababtoo ah Medicaid ayaa ah lacag bixiyaha ugu dambeeyo.

(Ku sii soco bogga 8)



Ma qabtaa su'aalo?

Haddii aad su'aalo qabtid, la soo xiriir:

- [ADRC-ga Deegaankaaga](http://dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm) (dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm).
- [Tribal ADRS kaaga](http://dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/tribes.htm) (dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/tribes.htm).
- Adeegyada Xubinta Medicaid ee 800-362-3002.

Qoraalada:



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

P-00088OSO (05/2024)